Casharka 51

1. Goorma ayuu Ciise billaabay inuu dadka Yuhuudda ah waxbaro?
-Kaddib markii Yooxanaa Baabtiisaha lagu riday xabsi.

2. Meeqa sannadood ayuu Ciise jiray markii uu billaabay inuu dadka Yuhuudda ah waxbaro?
-Wuxuu ahaa soddon jir.

3. Muxuu ahaa Ahbaarka Wanaagsan ee Ilaah ee Ciise dadka baray?
-Akhbaarka Wanaagsan ee Ilaah wuxuu ahaa inkastoo dembiga dadka oo dhan jaasadiisu ahayd dhimasho, haddna Ilaah wuxuu dadka u soo diray Badbaadiye iyaga ka badbaadinaya dembiyadooa.

4. Kuma ayuu ahaa Badbaadiyaha Ilaah u soo diray inuu badbaadiyo dadka?
-Ciise.

5. Maxaa uga gol lahaa markii uu lahaa, Wakhtigu wuu yimid, oo boqortooyada Ilaahway dhow-dahay.
-Ciise wuxuu uga gol lahaa wakhtigii Badbaadiyuhu iman lahaa waa la gaaray, oo boqortooyada Ilaahna ay ka adkaan doonto tan Shaddaanka.

6. Waa maxay jidka keliya ee qofi kaga farxin karo Ilaah?
-Waa isaga oo rumaysta Hadallada Ilaah.

7. Waa maxay sababta Ciise ugu yeerayey dadka inay isaga soo raacaan?



-Waayo Ciise wuxuu doonayey inuu iyaga wax baro si ay u awoodaan inay dadka kale Ilaah wax uga baraaan.

8. Yey ahaayeen macallimada Sharciga?
-Waxay ahaayeen Farrisiinta.

9. Sidee baa waxbariddii Ciise Masiix kaga duwanayd, waxbariddii Farrisiinta?
-Waayo Ciise wuxuu ahaa Rabbi, Ciise wuxuu garanayey Ilaaha Aabbaha ah, laakiin Farrisiinta ma ayan garanaynin Ilaaha Aabbaha ah.
-Waayo Ciise wuxuu ahaa Ilaah, Ciise wuxuu rumaysnaa eray waliba ee Hadallada Ilaah, laakiin Farrisiinga ma ayan rumaysnayn Eray Waliba ee Ilaah.

10. Bilowgii, yey ahaayeen jinniyada intaanay jinniyo noqon?
-Bilowgii, jinniyada waxay ahaayeen malaa'ig Ilaah abuuray ilaa intii ay ka raacayeen Shayddaanka oo dabadeetana ay shar ka noqdaan.

11. Miyaa jinniyada ay garanayaan in Ciise Rabbi ahaa?
-Haa.

12. Maxaa jinniyada ay uga cabsan jireen Ciise?
-Waayo jinniyada waxay garanayeen in Ciise awood u leeyahay inuu iyaga ku tuuri doono wakhti waliba ama goor waliba.

13. Sidee bay dembiga iyo barasku isku shaabbahaan?
-Isla sida qofka caadig aahi aanu isaga dawayn karin baraska, isla sidaas oo kale dadka oo dhan ma awoodaan inay iska bogsiiyaan dembiga.

-Isla sida dadku ayan qof kale uga bogsiin karin baraska, ayaanu qofi qof kale ka qaadi karin ama bogsiin karin dembiga.

-Masiixa oo keliya ayaa awood u leh inuu ddka ka bogsiiyo baraska, weliba, Ciise oo keliya kan innaga inaga bogsiin kara dembiga.

-Habeen habeennada ka mid ah ayaa nin lagu magacaabo Nikodemos wuxuu u yimid inuu booqdo Ciise.

Bal aynu ahrinno Yooxanaa 3:1-2

1-Waxaa jiray nin ka mid ahaa Farrisiinta oo la odhan jiray Nikodemos, oo Yuhuudda taliye u ahaa.
2- Isagu habeenkuu u yimid Ciise, wuxuuna ku yidhi, Macallimow, waannu og nahay inaad tahay macallin ka yimid Ilaah, waayo, ninna ma samayn karo calaamooyinka aad samayso hadaan Ilaah la jirin.

-Badanaa Farrisiintu way nebcaayeen Ciise.

-Badanaa Farrisiintu waxay oran jireen, Awoodda Ciise waxay ka timid Shayddaanka.

-Nikodemos wuxuu ahaa nin ka duwan Farrisiint akale,
-Nikodemos ma uusan nebcayn Ciise.

-Nikodemos wuxuu doonayey inuu la hadlo Ciise  oo uu weyddiiyo su'aalo badan.

-Maxaa Nikodemos ku yiri Ciise?
-Nikodemos wuxuu garanayey in Ilaah soo diray Ciise Masiix.



-Sidee buu Nikodemos ku garanayaa in Ilaah soo diray Ciise?

-Waayo Ciise wuxuu samaynayey mucjisooyin badan oo Ilaah keliya uu samayn karay.

-Maxaa Ciise ugu jawaabay Nikodemos?

Bal aynu arkhinno Yooxanaa 3:3

3-Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii, runtii waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu mar kale dhalan, boqortooyadii Ilaah arki kari maayo.

-Marka uu sidaas leeyahay muxuu Ciise ula jeedaa?

-Ciise wuxuu ula jeedaa in ddka oo dhan ay ku hoos dhasheen boqortooyada Shayddaanka, oo ay u baahan yihiin inay mar kale dhashaan.

-Sidee baa dadka oo dhan ugu hoos dhasheen boqortooyada Shayddaanka?

-Markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, oo Ilaah addeeci waayeen, waxaa iyaga laga  dhaqaajiyey boqortooyada Ilaah.

-Markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen oo addeeci waayeen Ilaah, waxay hoos yimaadeen boqortooyada Shayddaanka.

-Aadan iyo Xaawo carruurtii ay dhaleen ee kala ahaa Qaabiil iyo Haabiil, ayaa waxay ku hoos dhasheen boqortooyada Shayddaanka.

-Waayo Aadan iyo Xaawo way dembaabeen oo addeeci waayeen Ilaah, dadka oo dhamina waxay ku hoos dhasheen sababtaas aawadeed boqortooyada Shayddaanka.

-Ciise wuxuu ula jeedaa maga uga gol leeyahay dhalashada labaad in dadka oo dhan ay ku hoos dhasheen boqortooyada Shayddaanka addeecis-darradoodii awgeed, oo imminkana ay khasab tahay inay mar labaad dhashaan.

-Maxaa Nikodemos ku jawaabay?

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:4

4-Nikodemos wuxuu ku yidhi, Sidee baa nin mar kale u dhalan karaa isagoo duq ah? Miyuu mar kale uurkii hooyadiis geli karaa oo ka dhalan karaa?

-Nikodemos ma uusan garan Ciise.
-Nikodemos ma uusan garanaynin sida qofi mar kale u dhalan karo haddana.

-Nikodemos waxay la ahayd in Ciise ka hadlayo dhalasha labaad oo jidhka ah.

-Miyaa Ciise ka hadlayaa wax ku saabsan dhalashada labaad ee jidhka?
-Maya.

-Muxuu Ciise ugu jawaabay Nikodemos?

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:5



5-Ciise baa ugu jawaabay, Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu ka dhalan biyo iyo Ruuxa, boqortooyadii Ilaah geli kari maayo.

-Ciise wuxuu yiri waa inaynu mar kale biyo iyo Ruuxa ka dhalannaa.

-Ciise wuxuu kaloo yiri marka hore waa inaynu biyaha ka dhalannaa.

-Muxuu haddaba Ciise u leeyahay Qof haddaanu ka dhalan biyo?

-Miyaa dhalashada biyaha loo jeedaa makhuuriska?
-Maya.

-Miyaa Makhuurisku ina badbaadinayaa?
-Maya.

-Maxaa Ciise uga gol leeyahay, marka uu leeyahay: Haddaanu qofku ka dhalan biyo?

-Maxaa biyaha loogu isticmaalaa wasakhda?

-Inay nadiifyaan ama wasakhda gooyaan.

-Isla sida biyaha loogu isticmaalo wasakhda, ayaa dadka oo dhanna la doonayaa in dembiga looga gooyo.

-Markaa in qofku biyo ka dhasho ayaa waxay ka macne tahay inuu dembiyada laga soo noqdo, si Ilaah dembiyadayada inooga nadiifiyo.

-Tan labaad, Ciise Masiix ayaa wuxuu leeyahay, waa inaynu mar kale Ruuxa ka dhalannaa.

-Maxaa Ciise ka hadlayaa marka uu leeyahay, Ruuxa ka dhashay?

-Markii Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen oo Ilaah addeeci waayeen, ayaa ruuxoodii dhintay, oo Ilaah ka dhaqaaqay.

-Markii Aadan iyo Xaawo dembaabeen oo addeeci waayeen Ilaah, ayaa ruuxoodii awoodda u lahaa, inuu garto, jeclaado, addeeco Ilaah, isla wakhtigaas dhintay.

-Maaddama ruuxeennii dhintay, ayaa Ilaah wuxuu siiyey ruuxeenna nolol cusub.

-In qofku mr kale dhasho waxay ka macne tahay in Ruuxa Qodduuska ah ee Ilaah uu ruuxayaga siiyey nolol cusub.

-In qofku biyaha ka dhasho waxay ka macne tahay in qofku ka soo noqday dembiyadiisa si dembigiisii looga nadiifiyo.

-In qofku ka dhasho Ruuxa waxay ka macne tahay oo kale in Ruuxa Ilaah ay khasab ku tahay inuu nolol cusub siiyo ruuxeenna.

-Ciise wuxuu u sheegay Nikodemos inaanu la yaabin dhalashada labaad.

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:7

7-Ha la yaabin hadaan ku leeyahay, Waa inaad mar kale dhalataan.



-Waa maxay sababta Nikodemos aanu ula yaabin inuu mr kale dhasho?

-Masiixu sidan buu leeyahay, sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 3:6, waxaana qoran sidatan: Waxa jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana waa Ruux.

-Muxuu Masiixu uga gol leeyahay, markii uu leeyahay, Wixii jidhka ka yimaadaana waa jidh, Wixii Ruuxa ka yimaadaana waa Ruux?

-Waxaa Masiixu uga gol leeyahay jidhku jidh buu dhalaa, oo wax is-beddel ah ma leh, qofkuna waa isla qofkii. Markiise qofku Ruuxa ka dhasho isagu waa Ruux, oo Ruuxa Ilaah oo kaliya ayaa kaga dhalan karnaa Ruuxa.

-Marka la eego sida Ilaah wax inoogu fasiro ama macneeyo, ayaa waxaa dadka oo dhan loo qaybiyaa laba kooxood.

-Llooma qaybiyo caddaan iyo madow. Hodan iyo miskiin.

-Markii la eego sida Ilaah dadka dunida u kala qaybiyo, waa kuwama labadaas firqo ee dunida joogta?

-Waa kuwa hal mar kaleiya dhasha, iyo kuwa labada goor dhasha.

-Waa qoyskee kuwa halka mar dhasha?
-Kuwaasu waa qoyska Shayddaanka.

-Waa qoyskee kuwa labada goor dhashay ama hela oo qaabila dhalashada labaad?

-Waa qoyska Ilaah.

-Maxaa kale ee Ciise ku leeyahay ama barayaa Nikodemos?

Bal aynu akhrinno Yooanaa 3:14-15

14-Sidii Muuse abeesadii kor ugu qaaday cidlada, sidaasoo kale Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado,
15-in mid kastoo isaga rumaystaa uu lahaado nolosha weligeed ah.

-Miyaad xusuusataa qisadii Muuse iyo abeesadii naxaasta ahayd ee cidlada la dhigay?

-Waayo reer Binu Israa'iil way dembaabeen oo addeeci waayeen Ilaah, Ilaahna wuxuu iyaga u soo diray masas mariid kulul leh oo iyaga qaniina.

-Markii kuwo badan oo reer binu Israa'iil ah ay dhinteen, ayaa kuwii soo haray Ilaah u toobad-keeneen.

-Dabadeedna, Ilaah baa Muuse u sheegay inuu mas ka sameeyo naxaas, dabadeedna uu geed ka soo laad-laadiyo.

-Ilaah wuxuu ku yiri haddii reer binu Israa'iilka la qaniino ay fiiriyaan maska naxaasta ah ee lama-degaanka la dhigay, Ilaah baa isla markiiba bogsiinaya iyaga.

-Miyaa haddaba reer binu Israa'iil awood u lahaayeen inay iska badbaadiyaan dhimashada?

-Maya.



-Kuma ayuu ahaa kan keliya ee awooday inuu reer binu Israa'iil ka samatabbixiyo dhimashada?

-Ilaah oo keliya.

-Sidee baa Ciise iyo maska naxaasta ah ee Ilaah Muuse ku amray inuu cidlada ka dhex taago ay isku mid u noqonayaan?

-Ciise sidan buu leeyahay:

-Isla sidii abeesadii ama maskii naxaasta ahaa ee geedka laga soo laadlaadiyey oo kale, ayaa Ciisena iskutallaabta looga soo laadlaadinayaa.

-Isla sidii reer binu Israa'iil loo badbaadiyey oo kalemarkii ay eegeen abeesadii naxaasta ahayd, sidaas oo kalaa Ciise u badbaadin doonaa kuwa Isaga rumaysta.

-Maxaa kale ee Ciise ku leeyahay Nikodemos?

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:16

16-Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oodhashay in mid kastoo isaga rumastaa uusan lumin, laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah.

-Waayo jacaylka Ilaah dadka oo dhan jecel yahay, ayuu u soo diray Ciise oo ah Badbaadiyaha.

-Haddii aynu Ciise rumaysan nahay, dhiman mayno, laakiin waxayn helaynaa Nolosha daa'imka ah ee aynu Ilaah weligeen la noolaanayno.

-Maxaa kale ee Ciise ku yiri Nikodemos?

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:17

17-Ilaah Wiilka uguma soo dirin dunida inuu xukumo dunida, laakiin wuxuu u soo diray inay dunidu ku badbaaddo isaga.

-Waa maxay sababta Ilaah Ciise dunida ugu soo diray?

-Miyaa Ilaah Ciise u soo diray inuu dadka naclado ama xukumo?
-Maya.

Miyaa Ilaha Ciise u soo diray inuu dadka laayo?
-Maya.

-Ilaah wuxuu Ciise u soo diray inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dembiga.

-Ilaah wuxuu kaloo Ciise u soo diray inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dhimashada.

-Ilaah wuxuu kaloo Ciise u soo diray inuu dadka ka badbaadiyo awoodda Shayddaanka.

-Maxaa kale ee Ciise ku leeyahay Nikodemos?

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:18

18-Kii wiilka rumaystaa ma xukumna, laakiinse kii aan isaga rumaysan, hore ayaa loo xukumay, maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan magaca Wiilka Ilaah oo keliya oo dhashay.



-Miyaa kuwa Masiixa rumaysta Ilaah xukumayaa?
-Maya.

-Waa maxay sababta Ilaah u naclado kuwa aan Masiixa horey u rumaysan?

-Waayo ma rumaysna in Ciise yahay Badbaadiyaha.

-Maxaa kale ee Ciise ku leeyahay Nikodemos?

Bal aynu akhrinno Yooxanaa 3:19-20

19-Kanu waa xukunka, nuurka ayaa dunida yimid, dadkiise waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka, maxaa yeelay, shuqulladoodu shar bay ahaayeen.
20-Nin kastoo shar falaa nuurkuu nebcaadaa, umana yimaado nuurka, si aan shuqulladiisa loogu canaanan.

-Ciise wuxuu leeyahay kuwa sharka leh dooni maayaan Iftiinka.

-Ciise wuxuu kaloo leeyahay kuwa sharka leh waxay ku harayaan ama joogayaan gudcurka.

-Maxaa dadka sharka leh ay gudcurka ugu harayaan?
-Waayo waxay jecel yihiin dembiyadooda.

-Miyaad doonaysaa inaad haddaba sii joogto gudcurka, mise waxaad doonaysaa inaad maqasho Hadallada Ilaah?